



La sheekeeysga Ilmaha

Qoraal loogu talagalay carruurta da'da yar ee waaxdan xerada qaxootiga ku jirta

Salaan wanaagsan dhalinyaro! Ma doonaysaa inaad arrimaahaga nagala hadasho? Waxaa waaxdan carruurta da'da yar ka socda barnaamij loogu magacdaray la sheekeeysga ilmaha, kaasoo ujeeddadiisu ay tahay in dhallinyarada laga taageero arrimaha ku saabsan nololwanaagga iyo nolosha caadiga ee qofka dhalinyarada ah. Waxaan marka ugu horraysa yeelan doonnaa wadahadalka loogu magacdaray la sheekeeysga ilmaha oo muddada uu soconaayo ay tahay qiyaastii saacad illaa iyo saacad iyo bar (1-1½). Intaa dabadeed waxaan si wadajir ah uga fekeraynaa qofka dhallinyarada ah ma u baahan yahay taageero, arrinkaasna yaa ka caawin kara.

Waxyaabaha aan kaga hadlayno barnaamijkaan la sheekeeysga ilmaha waa:

- Qaab sidee ah ayay u socdaan arimaha nolosha caadiga ah ee ilmaha, iskuulka, waaxda carruurta iyo xilliyada firaaqadaba.
- Waa maxay arrimaha qofka dhallinyarada ah ilaalinaaya ama badbaadada u ah
- Meelaha uu qofka dhallinyarada ah ku xooggan yahay iyo meelaha uu u jilicsan yahay ee arrimihisa nololeed ee caadiga ah

Xoogganaanta waxaa loola jeedaa, arrimaha sida wanaagsan ee caadiga ah ugu socda. U jilicsanaantana waxaa loola jeedaa, arrimaha ay dhibaatadu ka haysato, amaba arinka laga yaabo in ay dhibaato ka timaaddo, haddii wax laga qaban waayo.

Xoogganaanta iyo u jilicsanaantuba waa kuwo ka dhasha islaafalgalka qofka dhallinyarada ah iyo degaanka ku hareereysan, waxaana suurtagal ah in arrimahaas wax laga qabto oo saamayn lagu yeesho.



Falalka ama waxyaabaha badbaadada ah waxaa ay ka caawinaayaan in uu arrimihisa si wanaagsan uga soo baxo

Waxaaayabaha badbaadada ah waa:

- Nolosha caadiga ah ee leh nidaamka joogtaysan, cunto caafimaad leh iyo nasahso ku filan:
- Xiriir wanaagsan oo uu la leeyahay qoyskiisa iyo ehelkiisaba
- Xiriir sokeeye oo isaaminaad ku dhisan oo uu la leeyahay qof weyn oo ka mid ah dadka hawlahiisa gacanta ku haya (tusaale ahaan iskuulka, goobta hiwaayadda, waaxda carruurta)
- Faham ku habboon da'diisa oo ku saabsan xaaladdiisa nololeed
- Dareenka ah in uu yahay qof ka tirsan fasalkiisa iyo bulshada uu la nool yahayba
- Waxbarashada ama iskuul dhigashada qofka dhallinyarada ah
- Qofka dhallinyarada ah wuxuu muujin karaa dareenkiisa, waxaana taageero la siinayaan maalmaha adag ee noloshiisa soo mara
- Hiwaayado wanaagsan
- Saaxiibbo la da'ah

Wadahadalkan loogu magac daray la sheekeeysga ilmaha waa mid aan khasab ahayn oo qofku iskiis uu u imaan karo, mana ahan mid saamayn ku leh arrimaha magangalyodoonka qaxootinnimo ama go'aamada arrinkaas la xiriira.